PennState Health

# HEALTH CARE POWER OF ATTORNEY

Aniga oo ah, ______________________________

Taariikhda Dhalashada: ______________________________

Magacaw: ______________________________

*Magaca Wakiilka (Qofka go'aannada caafimaadka ii gaari kara haddii aanan awoodin)*

______________________________

*Ciwaanka*

______________________________

*Lambarka Taleefanka*

______________________________

*Iimaylka*

inuu noqdo Wakiilkayga Daryeelka caafimaadka si uu iigu gaaro go'aannada caafimaadka iyo kuwa shaqsiga ah haddii aanan awoodin inaan gaaro go'aanadeyda si madax banaan. Qofka magaciisa kor lagu sheegay ma awoodo inuu noqdo wakiilkayga sabab kastaba, waxaana magacaabayaa qof kale oo noqonaaya wakiilkayga:

______________________________

*Magaca Wakiilka Kale*

______________________________

*Ciwaanka*

______________________________

*Lambarka Taleefanka*

______________________________

*Iimaylka*

Wakiilkaan Awooda Daryeelka caafimaadka ayaa dhaqan galaaya marka aan awoodi waayo. Waxaan u fasaxayaa awoodaha soo socda wakiilkayga:

1. Inuu ogolaado in la ii dhigo ama la iga saaro xarunta caafimaadka, hooyga kalkaalinta, ama xarun lamid ah iyo inuu galo heshiisyo la xiriira daryeelkayga.
2. Inuu ogolaado, diido, ama ka laabto ogolaanshaha mid uun iyo dhammaan noocyada qaliinnada caafimaadka iyo daawaynta, daryeelka, daawada, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, tuubo gelinta, qaliinka sixista shaqada jirka iyo nafaqada ama biyaha la igu siiyo qaababka macmalka ah ama tuubada la ii geliyo.

Waxaan ka hadlay doonistayda quseeya daryeelka caafimaadka wakiilkayga, kaasoo raaci doona tilmaamaha aan siiyay ilaa inta la ogyahay. Haddii wakiilkaygu uusan awoodin inuu go'aamiyo waxa aan dooni lahaa, markaas waa in wakiilkaygu gaaro go'aan ku dhisan waxa uu aaminsan yahay inay maslaxada koowaad iigu jirto. Waxaan ka noqonayaa awood wakaalad oo hore oo kasta oo aan ku baxshay daryeelka caafimaadka.

Saxiixayga hoose ayaa ka dhigan inaan fahmaayo dukumiintigaan waxaana doonayaa inay noqoto mid sharcigu qabanaayo.

______________________________ ______________

*Saxiixa* *Taariikhda/Waqtiga*

______________________________ ______________

*Saxiixa Marqaatiyaasha* *Taariikhda/Waqtiga*

______________________________ ______________

*Saxiixa Marqaatiyaasha* *Taariikhda/Waqtiga*



**HEALTH CARE POWER OF ATTORNEY**

PennState Health

Haddii aan nahay Penn State Health, waxaan ilaalinaa xuquuqda dadka ee gaarista go'aannada ku saabsan daryeelkooda caafimaadka. Da' kasta, xaalad caafimaad oo lama filaan ah ayaa dadka u diidi karta awood ay ku gaaraan go'aanadooda caafimaadka ee madaxa banaan. Qorsheyntu waxay gacan ka gaysataa xaqiijinta in dadku ay helaan daryeelka ay doonayaan. Xulashada qof kuu gaara go'aannada daryeelka caafimaadka, oo la yiraahdo Wakiilka Daryeelka Caafimaadka, ayaa talaabo muhiim ah u ah hawshaan.

**Waa maxay Wakiilka Awooda Go'aan Ka gaarista Daryeelka Caafimaadka (Health Care Power of Attorney, HCPOA)?**

- *HCPOA waa dukumiinti aqoonsanaaya hal qof ama ka badan oo aad ku kalsoon tahay inuu u sheego dhakhaatiirta caafimaadka go'aanadaada ku aadan daryeelka caafimaadka, marka aadan awoodin inaad adigu sheegto.*
- *HCPOA caadiyan waa qayb kamid ah dukumiintiyada kale ee loo yaqaano Dardaaranka horey Loo sii qoray ama Dhaxalka Nool.*

**Qofkee ayay tahay inaan u magacaabo Wakiilkayga Daryeelka caafimaadka?**

- *Wakiilkaaga Daryeelka caafimaadka waa qofka aad u magacawdo inuu go'aano ka gaaro daryeelkaaga caafimaadka marka aadan awoodin inaad go'aanadaas u gaarto si iskaa ah.*
- Wakiilkaaga Daryeelka caafimaadka ayaa noqon kara xubin kamid ah qoyska ama saaxiib kuu dhow kaasoo aad ku kalsoon tahay inuu go'aano adag gaaro. Qofkaan waa inuu si cad u fahmaa doonistaada uuna aqbalaa inuu qaato masuuliyada ah inuu go'aanadaas kuu gaaro. Waa muhiim inaad u sheegto HCPOA gaaga shaqadiisa.
- Waxaad haysataa dookh aad ku magacawdo qof labaad oo ah Wakiilkaaga Kale ee Caafimaadka. Wakiilka kale ayaa shaqada la wareegaaya haddii qofka koobaad ee aad magacawday uusan awoodin, doonayn, ama aan la heli karin.
- Waxaad magacaabi kartaa dhakhtar qayb ka ah daryeelkaaga.
- Ma magacaabi kartid shaqaalaha dhakhtarkaaga ilaa in qofkaani yahay maahee qaraabo aan adeegyada daryeelka caafimaadka asagu ku siinayn.

**Ka waran haddii aanan jir ahaan awoodin saxiixida foomka?**

- Haddii aadan awoodin inaad saxiixdo, waxaad si gaar ah ugu ogolaan karta qof kale inuu taariikhda iyo saxiixa qoro asagoo wakiil kaa ah.

**Yaa markhaati ka noqon kara dukumiintiga Wakiilka Awooda Daryeelka Caafimaadka?**

*Dukumiintigaan waa inay markhaati ka noqdaan 2 qof oo waawayn, 18 sano ama ka wayn, sida fiicana xubin kamid ah qoyska ama saaxiib.*

- Markhaati <u>ma noqon kartid</u> adiga, Wakiilka Daryeelka caafimaadka ee aad Magacaabatay, qof saxiixaaya dukumiintiga asagoo wakiil kaa ah (haddii aadan jir ahaan awoodin inaad saxiixdo) ama dhakhtar qayb ka ah daryeelkaaga.

**Goorma ayuu Wakiilka Awooda Daryeelka caafimaadku dhaqan galayaa?**

- Kadib marka la saxiixo laguna qoro taariikhda ayadoo ay joogaan labo markhaati, HCPOA ayaa dhaqan galaaya keliya inta aadan awoodin inaad go'aannada caafimaadka iskaa u gaarto.

**Ka waran haddii aan horay u haystay Dardaaranka hore Loo sii Qoray?**

- Waa inaad foomkaan buuxisaa keliya haddii aad dooneyso inaad beddesho Wakiilkaaga Daryeelka caafimaadka aadna ka dhigayso qof ka duwan kan ku qoran dukumiintigaaga hore.
- Foomkaan ayaa badelaaya dukumiinti kasta oo hore oo quseeya Wakiilka Awooda Go'aan ka gaarista Daryeelka caafimaadka.
- Haddii aad horay u buuxisay Dhaxalka Nool, markaas Dhaxalka Nool ayaa sii shaqeynaaya. Haddii HCPOA uu qayb ka ahaa Dardaraanka Dhaxaka Nool, foomkaan ayaa badelaaya keliya qaybtaas.

**Foomkayga waa la saxiixay markhaati ayuuna lahaa. Maxaan hadda sameeyaa?**

- Ku hayso nuqulka orjinaalka ah meel amaan ah laakiin la gaari karo.
- Sii nuqul kooxdaada caafimaadka ee rugaha caafimaadka iyo isbitaallada aad daryeelka ka hesho.
- Sii nuqullo Wakiilkaaga Daryeelka caafimaadka iyo Wakiilka Kale ee Daryeelka caafimaadka, qoyska, iyo qof kasta oo qayb ku lahaan kara daryeelkaaga.
- Haddii aad dooneyso inaad faahfaahiso doonistaada, la hadal kooxdaada daryeelka caafimaadka ama la tasho qareen si aad u hesho dookhyadaada sharciga.

**Ka waran haddii aan doonaayo inaan beddelo Dukumiintiga Wakiilka Awooda Go'aan ka gaarista Daryeelka caafimaadka?**

- Dukumiintigaan waa laga laaban karaa ama la beddeli karaa.
- Haddii aad dooneyso inaad beddesho dukumiintiga, waa qasab inaad buuxiso mid cusub aadna ku qortaa Ka laabo dukumiintigii hore, adoo raacinaaya taariikhda.
- Kadib marka aad samayso isbadello ama abuurto dukumiinti cusub, sii dukumiintiga cusub qof kasta oo haysta nuqulka orjinaalka ah.
- Waa inaad la tashataa qareen si aad ugala hadasho dookhyadaada.

***Dhakhaatiirta:*** Fadlan tixraac Xeerarka Penn State Health (uuna ku jiro Tusmada Dardaaranka horey Loo sii qoray) si aad u hesho xog dheeri ah.